AFRICAN UNION
MISSION IN SOMALIA
**[AMISOM]**

UNITED NATIONS ASSISTANCE
MISSION IN SOMALIA
**[UNSOM]**

**Warsaxaafadeed degdeg**

**WARSAXAAFADEED WADAJIR AH**

# Kooxda shaqo ee wadajirka ah ee ka dhexeysa Qaramada Midoobay iyo AMISOM ee ku aaddan xuquuqul insaanka ayaa qabatay kulankii ugu horeyeeyay

**Muqdisho, 15 Febraayo 2014 –** Kooxda shaqo ee wadajirka ah ee ka dhexeysa Qaramada Midoobay iyo AMISOM ee ku aaddan Siyaasadda Feejignaanta Dhabta ah ee Xuquuqul Insaanka (HRDDP) ayaa kulankeedii ugu horeeyay ku qabatay magaalada Muqdisho 15kii bishan Febraayo, iyadoo kaga wadahadashay siyaabo kala duwan oo lagu dhisayo hay'adaha qaranka Soomaaliya oo leh saldhig xuquuqul insaan oo xoog leh.

Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa maalintii 13kii bishii July 2011 ogolaaday siyaasadda HRDDP ee ay Qaramada Midoobay ku taageerto ciidamada amaanka aan Qaramada Midoobay ahayn. Siyaasaddan waxay xaqiijinaysaa in Qaramada Midoobay ay ka soo baxdo mabaadi'da iyo xeerka u degsan iyadoo damaanadqaadaysa in taageerada ay u fidiso ciidamada amaanka aan Qaramada Midoobay ahayn ee jooga adduunka dacalladiisa ay waafaqsanaato Xeerka hay'adda waajibaadkeeda iyadoo la raacayo sharciga caalamiga, oo la dhowro, sare loo qaado, lana dhiirigeliyo xushmaynta sharciga caalamiga ee dagaallada, sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha iyo Sharciga Qaxootiga.

Kooxda shaqo ee wadajirka ah ee siyaasadda HRDDP waxaa wada-shirguddoomiyay Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika (SRCC), Danjire Mahamat Saleh Annadif, iyo Ku-Xigeenka Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Fatiha Serour, waxaana dhisay Qaraarka Golaha Amaanka Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 2124, kaasoo ka doonayaa UNSOM, Xafiiska Qaramada Midoobay Taageerada AMISOM (UNSOA) iyo AMISOM inay ka wadashaqeeyaan hirgelinta Siyaasadda HRDDP.

Siyaasaddan ka jirta Soomaaliya waxay ku saabsantahay taageerada ay xifiisyada iyo hay'adaha Qaramada Midoobay u fidiyaan Ciidaamada Amaanka Qaranka Soomaaliyeed iyo AMISOM. Tallaabooyinka ugu waaweyn ee siyaasadda HRDDP waxaa ka mid ah in siyaasadda la gaarsiiyo hay'adaha ku lug leh, in la dejiyo habraacyo lagu soo farageliyo ama wax looga qabto haddii ay ciidamada aan Qaramada Midoobay ahayn geystaan xadgudubyo la xiriira xuquuqda aadanaha, qiimeynta khatarta iyo kormeerka.

La-Gudoomiyeyaasha kooxda shaqo waxay caddeeyeen in tallaabadan cusub ay waafaqsantahay dadaalka ay UNSOM iyo AMISOM ku xoojinayaan wadashaqeyntooda iyo taageerada ay siinayaan dadaalka Dowladda Federaalka ay ku xasillinayso Soomaaliya.

“Xuquuqul Insaanku waa arrimo welwel nagu haya. Waxaan ognahay inay jiraan waajibaad ay farayaan dhammaan qaraarrada Qaramada Midoobay, waxaana sameynayaa wax alla wixii aan kari karno  si aan u dhowro arrintan,” ayuu kulan ka yiri Danjire Annadif.  “Waxaa jirta baahi loo qabo in la hanaanka dhaqangeliyo. AMISOM waxay rabtaa inay sidaa sameyso, waana ka gudbi doonaa caqabadaha jira anagoo taageero iyo wadashaqayn ka helayna Qaramada Midoobay iyo asxaabta kale ee aan hawsha wadaagno.”

“Waxaa loo baahanyahay in la dejiyo hanaan lagu hirgeliyo laguna kormeero ballanqaadkeena; waxaan u baahanahay xiriir joogta ah, anaga nagu eg, oo arrinta diiradda lagu saarayo, oo natiijo dhaliya,” ayay tiri K-Xigeenga Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay (DSRSG) Serour. “Tani waa billowga xiriir miradhal ah oo annaga nagu kooban.”